



**Ministry of
JUSTICE**

National Offender
Management Service



**Tallaabada
dheeree si aad
shaqo u hesho.**





Sida aad u heli karto gargaar lagaa siiyo helitaanka shaqo.

Muddada aad ku jirto carbinta gudaheed waxaa jira siyaabo farabadan oo aad ku wanaajin karto fursadaha kaaga diyaar ah helitaanka shaqo:

- Casharro aad tagto si lagaaga caawiyo wax akhriskaaga, wax qoristaada ama xisaabaadka
- Koorsooyin ama barnaamijyo aad ka soo qayb qaadato
- Xirfado cusub oo aad ku barato mashruuca dib ugu faa'iidaynta bulshada (community payback)
- Gargaar aad doonato si lagaaga caawiyo codsashada shaqooyinka ama helitaanka taageero kale

Waxaa jira dad adiga ku caawin kara – maamulahaaga dembiilaha/ maareeyahaaga ayaa kuu sheegi kara sida ay dadkaasi kuu caawin karaan.

Waxa aan weliba kuu sheegaynaa

Waxa aan annagu lacag ka helnaa Sanduuqa Bulsheed ee Yurub (European Social Fund) (ESF) si loogu bixin karo taageeradaas.

